



info@onejubaland.com

August 19, 2019

Ku: Guddiga Madaxa Banaan ee Xuuddudaha iyo Doorashooyinka Jubaland  
Midowga Musharaxiinta Isbadel Doonka Maamul Goboleedka Jubbaland  
Golaha Odayaasha Jubaland  
Golaha Aqoonyahanada Jubbaland

Mudanayaal,

**Ujeedo: Baaq ku socoto murashaxiinta u taagan doorashada Jubbaland.**

Anigoo ah Abdirazak Fartaag oo ka mid ah murashaxiinta u taagan madaxtinimada Jubbaland waxaan manta oo bishu ay tahay 19/08/2019 aan baaqaan u dirayaa dhamaan murashaxiinta ila midka ah ee kor ku xusan:

1. Iyadoo la eegaayo qoraaladii ka soo kala baxay wakiilka qaramada midoobay u qaabilsan Somalia iyo IGAD oo labaduba sidii caadada u ahyad aan waxba ku soo kordhin in xal waara laga gaaro xaaladaha adag ee soo noqo- noqday ee ka taagan dalkeena ilaa sanadkii 2000.
2. Iyadoo qoraladaas ay cuskadeen shuruuc aan weli taaba gelin, welina aan laysku raacin oo ku saabsan wada shaqaynta u dhexaysa dawlada dhexe iyo tan gobolada.
3. Iyadoo ay hada cadaatay in dawlada hogaamiya beesha caalamaka gaar ahaan reer galbeedka ay si buuxda ugu fashilmeen mudo 19 sano ah in ay taaba geliyaan dib hishiisiin dhab ah in dalkeenu yeesho, hayadihii dawladnimo ay shaqo buuxda qabsadaan, isbedel dhaqaale mid amni iyo tu maamul oo ka maran musuq maasuq Soomalia in ay ku talaabsado.

Saas awgeed, waxaan Murashaxiinta u soo jeedinayaa arimahan soo socda.

1. In si xilkasnimo iyo wadaniyad ku jirto aan uga tashano arimaha doorashooyinka hada taagan.
2. In aan anagoo si wadajir ah isu kaashanayna aan u muujino foorjignaan buuxda oo aan ka qabno habraacaan soo noq - noqday oo ay beesha caalamku cadaaysteen oo ah in iska horimaad ula kac ah loo dhax dhigo had iyo jeer dawlada dhexe iyo maamulada.
3. In aan isha ku hayno in ay jiraan hishiisyo aan is ogayn sida dekedaha, shidaalka iyo kaluumaysiga oo qaybo ka mid ah dawlada ku boohoobay beesha caalamaka arimaha Soomaliya ay la galeen dawlada dhexe iyo maamul gobaleedyada.
4. In aan fahmno in xalku uusan ku jirin in aan ka filano in ay beesha caalamku badbaadin doonto Somalia, lana ogaado in aysan soo kal dhawaysanayn madax Soomaliyeed oo bulshadooda aan la talada ahayn.


## Mudanayaal

1. Hadfka aan tartanka aan u galyno waa in uusan noqon sidii murashixiinta horay looga bartay oo ahayd jegada qofka haya kala wareeg, adigoo wax kasta u isticmaalaya. Waa in aan tusaalooyin ka qaadanaa khaldaadkii ka dhacay maamul gobeedyada kale sida, Hirshabeele, Koonfur Gaklbeed iyo arimaha cakiran ee haatan Galmudug ka taagan.
2. Waa in aan fahamnaa arimo badan oo siyasadeed oo is dhex yaal in dalkeena ay haysataan xiligaan, iyo in danta beelaha walaalaha ah oo ku wada nool Jubbaland ay tahay in laga dhawro wax kasta oo keeni kara kala qaybsanaan iyo xasilooni daro.
3. Waa in aan hormuud u noqnaa in aan la dagalano dhaqanka la caadaystay oo ahyd in odayaal dhaqameedka iyo xildhibaanada lacag la siisto, si dhaqanka suuban mar kale dalka uu uga bilawado, anagoo beenaynayna hadaladii wariyada caanka ah ee BBC, Mary Harper ay ku timaamtay sharci dejiyaasheena (Hildhibaanada) in xaraash lagu kala iibsado.

## Gabagabo

Waxaan adkaynayaa aragtida ah in isku halaynta dawlada dhexe iyo maamul goboleedka Jubbaland iyo murashixiinta qaar ay isku halaynayaan dawlado ama hayado caalami ah, in aysan marnab kooxna siin doonin guul buuxda oo dan u noqonta beelaha kala duwan ee wada dagan gobolada Jubbaland.

Mahadsanidiin,



Cabdirasaaq Fartaag  
Murashax Madaxweyne (Gudoomiyaha Maamulka Jubaland)